Disability Rights OHIO

# XAASHIDA 3-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

MAXAAN SAMAYN KARAA HADDII ILMAHAYGU U BAAHAN YAHAY ADEEGYO DHEERI AH?

## I. TALLAABADA KOOWAAD: CODSO ADEEGGA

**La xidhiidh iskuduwahaaga waxbarashada qaaska ah.** Kala hadal isku-duwaha waxbarashada qaaska ah ee dugsigaaga. Ka codso isku-duwaha inuu kaa caawiyo habka lagu go'aaminayo in adeeg lagama maarmaan u yahay ilmahaaga iyo in kale. Habka waxaa ku jiri doona go'aaminta in adeeggu uu lagama maarmaan u yahay imtixaan ama qiimeyn iyo in kale, in kulanka IEP looga hadlo baahida cunugaada u qaba adeegga, iyo in adeegga lagu qoro IEP.

> **Talo:** Haddii isku-duwahaaga waxbarashada qaaska ah uu ka soo jawaabi waayo codsigaaga, dir warqad dabagal ah oo aad ku codsanaysa kulanka IEP/504 si looga hadlo adeegyada ilmahaaga.

## II. TALLAABADA LABAAD: TAAGEER CODSIGAAGA

**U sheeg in dugsigu qiimeeyo in adeeg gaar ahi lagama maarmaan yahay iyo in kale.** Degmada dugsigaaga waxaa looga baahan yahay inay go'aamiso baahida ilmahaaga u qaba adeegyada waxbarashada qaaska ah. Haddii dugsigaagu aanu hore ugu sameyn ilmahaaga qiimayn ku aadan adeega aad rabto, codso in ilmahaaga la qiimeeyo.

**Go'aami in qiimayn faahfaahin dheeri ah leh ay lagama maarmaan tahay iyo in kale.** Waxa laga yaabaa in aad dhakhtarka ilmahaaga ama ilo kale ka heshid macluumaad sheegayo in qiimaynta ilmahaagu ay u baahan tahay in lagu daro macluumaad uusan caadiyan dugsigu qiimayn. Xaqiiji in kooxdu ay wax ka qabato qiimayn aad u faahfaahsan, haddii loo baahdo.

**Sii dugsiga macluumaad ka socda qiimeeyayaal madaxbannaan.** Dugsigaagu waa inuu tixgeliyo macluumaad kasta oo aad bixin karto kaasoo taageeraya codsigaaga ku aadan adeegga. Tusaalooyinka macluumaadka noocaan ah waxaa ka mid noqon kara qiimeyn ka timid daaweeyaha/dabiibiyaha hadalka ee gaarka ah taasi oo ku talinaysa in dabiibinta hadalka lagu sameeyo dugsiga, ama warqad uu dhakhtar soo qoray oo farayso in adeegyada dabiibinta jireed lagu bixiyo dugsiga.

> **Talo:** Adeegyada dugsiga la xidhiidha waa in la bixiyaa kaliya haddii ay lagama maarmaan u yihiin in ilmahaagu uu ka faa'iidaysto waxbarashadiisa oo uu helo FAPE. Qiimeeyuhu waa inuu tani tixgeliyo marka uu soo jeedinayo talooyinka ku aadan adeegyada lagu bixiyo goobta dugsiga.

# XAASHIDA 3-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

## MAXAAN SAMAYN KARAA HADDII ILMAHAYGU U BAAHAN YAHAY ADEEGYO DHEERI AH?

**Ka codso dabiibiyahaaga/qiimeeyaha gaarka ah inuu la xiriiro dugsigaaga.** Ka codso dabiibiyaha ama qiimeeyaha gaarka ah ee ilmahaaga inuu la xiriiro dugsigaaga si aad ugala hadasho wixii tallooyin ah. Waxaa qancin weyn leh in qofka soo jeedinaya tallada uu la hadlo dugsigaaga beddelkii uu hadal la'aan dugsigaaga u diri lahaa talooyinka qiimaynta.

### III. TALLAABADA SADDEXAAD: KULAN

Jadwalee kulan kooxeed si aad dib ugu eegtaan macluumaadka qiimeynta, u go'aamisaan in adeegyo dheeri ah ay lagama maarmaan yihiin iyo in kale, oo aad waxa uga beddeshaan qorshaha qoran.